# Ogeysiinta xuquuqda iyo waajibaadka Ka-qeybgalaha
(Participant Rights and Responsibilities Notification)

Foomkan waa shuruudaha Medicaid Home and Community-Based Services (Adeegyada Guriga iyo Bulshada Gudaheeda) (HCBS) Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) ee Buugyaraha Children's Long Term Support (Taageerada Children's ee Muddada Dheer) (CLTS) Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) (P-02256), Cutubka 8aad.

**Markaad tahay codsadaha/ka-qeybgalaha Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS, waxaad leedahay xuquuqo iyo waajibaadyo gaar ah.**

## A. Codsashada Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS

1. Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego adeegyada ay bixin karaan oo ay kuu maalgelin karaan Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS iyo barnaamijyada kale.
2. Waxaad xaq u leedahay in aad soo codsato Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS. Waxaad xaq u leedahay in aadan ka qeyb qaadan Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS. Oggolaanshaha adeegyada iyada oo loo marayo Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS waa in lagala shaqeeyo ilaha kale ee maalgelinaya.
3. Waxaad xaq u leedahay in ay kula soo xiriiraan shaqaalaha xafiiska taakuleynta si laguugu qabto ballanta booqashada guriga ilaa 10 maalmood gudahood taariikhda lagu gudbiyo ka dib.
4. Waxaad xaq u leedahay qof aqoon u leh in uu soo buuxiyo xaqu-yeelashada go'aaminta Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS ilaa 45 maalmood laga bilaabo taariikhda lagu gudbiyo.
5. Haddii codsigaaga la soo diido, waxaad xaq u leedahay in aad cabasho u soo dirsato degmada ama aad rafcaan u dirsato gobolka, ama labadaba. Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego sida loo soo dirsado cabashada ama rafcaanka, oo waxaad xaq u leedahay in qorista lagugu caawiyo.

## B. Go'aaminta adeegyada aad ka hesho Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS

1. Haddii la soo oggolaado go'aanka xaqu-yeelashada oo aad isku diiwaangeliso barnaamijka, waxaad xaq u leedahay in laguu soo qiimeeyo baahidaada oo aad si wadajir ah ilaa 60 maalmood gudahooda u buuxio Individual Service Plan (Qorshaha Adeegga Shakhsiyeed).
2. Waxa aad xaq u leedahay in aad qeyb ka noqoto habka qorsheynta oo aad sheegato wixii fikrado ah iyo waxa aad door bideyso. Waxaad xaq u leedahay in aad keensato asxaab, qaraabo ama qof kasta oo kale oo aad rabto in uu hawshaada qeyb ka noqdo. Waxa aad xaq u leedahay in aad adigu guddoomiso kulan kasta adigoo u qabanaya wakhti iyo goob idinku habboon adiga iyo dadka aad dooneyso in ay kaaga qeybgalaan, marka laga reebo hal kulan oo ah kan sannadka oo ay khasab tahay in uu ka dhaco gurigaaga.
3. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho koobbi qoraal ah iyo sharraxaadda qiimeyntaada iyo waraaqo kasta oo kale ama warbixin wixii ku jira feylkaaga haddii aad codsato.
4. Waxaad xaq u leedahay ilaa 14 maalmood gudahood codsiga ka dib in qoraal ahaan lagugu soo ogeysiiyo marka wax ama codsi adeeg ah laguu oggolaado ama laguu diido. Go'aankan waxaa la sii kordhin karaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah; iyo, waxaad xaq u leedahay in laguu soo sheego wixii ku saabsan kordhinta wakhtiga.
5. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaad kasta oo aad u baahan tahay si aad u fahamto iyo si aad uga qeybgasho qorsheynta iyo kulamada kale. Caawimadda waxaa ka mid ah turjubaan, in cod laguu soo duubo ama farta indhoolaha, ama siyaabo kale in laguula soo xiriiro.

6. Waxaad xaq u leedahay inaad ku naqshadeysato qorshahaaga adeegyada ee sharciyada Barnaamijka xeerarka CLTS Waiver (Taakuleynta). Qorshaha waa in si cad loogu qoro adeegyada aad kula heshiisay; oo waa in lagu muujiyo natiijooyinka aad rabto in aad gaarto iyo waxa la samayn doono si hawsha loo qabto. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho koobbiga qorshahaaga iyo in qorshaha laguu sharxo.
7. Waxaad xaq u leedahay in aad kala doorato adeegyada aad u baahan tahay ee aad ku gaari karto natiijooyinka aad rabto, iyo in aad doorato shaqaale aqoon leh oo kuu adeegi doona. Shaqaalaha mushaarka qaadanaya waa in ay aqoon u leeyihiin shaqadooda. Waxaad xaq u leedahay in lagaala hadlo maslaxadaha iska hor imaanaya ee ah shuruudaha adeegga ka hor inta aadan dooran shaqaalaha adeegga. Waxaad xaq u leedahay in lagugu caawiyo sidii aad u heli lahayd shaqaale aqoon leh.
8. Waxaad xaq u leedahay in aad diiddo qorshahaaga adeegga ama wixii qorshaha laga beddelo. Waxaad xaq u leedahay in aad diiddo yareynta adeegyada haddii aad u malayneyso in aan lagaa dabooli karin baahiyada aad qabto. Waxaad xaq u leedahay inaad xafiiska taakuleynta weydiisato beddelka wixii aad adigu diiddo. Haddii aadan ku raacsaneyn wax kasta oo go'aan ah oo laga gaaray adeegyadaaga ama shaqaalaha, ama isbeddellada qorshaha adeegga, waxaad xaq u leedahay in aad soo dirsato cabashada degmada iyo/ama rafcaanka gobolka.

## C. Helitaanka adeegyada Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS

1. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho adeegyo haddii maalgelin laguu helo, oo waxaad xaq u leedahay Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS markay jirto calaamad adeeg baahi oo macquul ah. Waxaad xaq u leedahay qalab gaar ah ama qaabilaad kale oo ah fursad aad ku heli karto guri, bulsho, iyo adeegyada Waiver (Taakuleynta) Medicaid.
2. Haddii maalgelin la waayo, waxaad xaq u leedahay in lagugu qoro liiska sugitaanka adeegyada. Haddii laguu sheego in aad sugto adeegyada Waiver (Taakuleynta) CLTS, waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida uu liiska sugitaanku u shaqeeyo iyo in aad ogaato wixii cusub oo ku saabsan inta qof ee kaa horreysa iyo markay shirakaddu qiyaasto in aad heli doonto adeegyo.
3. Waxaad xaq u leedahay in aad xor ka ahaato bixinta ama in aad wax ku darto qeyb kasta oo ka mid ah kharashka adeegyada adeegyada taakuleynta ee dhaafsiisan inta la go'aamiyey in aad bixineyso ee ah masuuliyadda waalidka (Wis. Maamulkeeda. Sharciga § DHS 1.065).
4. Waxaad xaq u leedahay in aad caawimaad ka hesho isku-duwaha taageerada iyo adeegga ka dib markaad laguu bilaabo adeegyada. Waxaad xaq u leedahay in aad isku-duwaha la kulanto mar kasta oo aad u baahan tahay. Isku-duwaha adeegga iyo taageerada ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta ah helidda adeegyada ku jira qorshahaaga, in ay leeyihiin tayo sare iyo in ay adeegyadu si fiican kuugu wada shaqeeyaan.
5. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho ogeysiis qoraal ah, **ugu yaraan 10 maalmood ka hor taariikhda dhaqangelinta,** wixii ah ficil ama go'aan kasta oo lagu yareynayo ama lagu joojinayo adeegyada 42 CFR § 431.231(c)(2). Waxaad xaq u leedahay in aad dirrsato cabashada degmada ama racfaanka gobolka haddii aadan ku raacsaneyn yareynta ama joojinta adeeg kasta oo laguugu oggolaaday barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS.
6. Haddii aad soo dirsaneyso **racfaanka gobolka** ka hor joojinta ama taariikhda dhaqangelinta ee laguugu sheegay ogeysiiska joojinta ee aad ka heshay xafiiska taakuleynta, oo waxaad xaq u leedahay in aad sii wadato helitaanka noocyada iyo caddadka adeegyada aad qaadaneysay ilaa racfaanka go'aan laga soo gaarayo.

7. Haddii aad soo dirsato racfaan oo aad sugto adeeg(yo) la sii wadi lahaa ilaa inta go'aanka laga soo gaarayo dacwad-dhagaysiga rafcaanka oo ka dibna go'aanku ayido ficil lagu yareynayo ama lagu joojinayo adeegyada, waxa laga yaabaa in lagaa qaado kharashka adeega(yada) (42 CFR § 431.230(b)). Dibu-soocelin ayaa laga yaabaa in lagaaga codsado kharashka adeeg kasta oo la saameeyay markii laguugu oggolaaday Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS ee aad bilowga ku hesho taariikhda dhaqangelintii hore ee ogeysiiska ficilkii diidmada ahaa ilaa oo waxaa ku jirta taariikhda go'aanka dacwad-dhageysiga racfaanka.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad u guurto meel kasta oo ka mid ah Gobolka Wisconsin adiga oo aan lagaa goyn oggolaanshaha adeegyada ee Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS.

## D. Xuquuqda racfaanka gobolka

1. Adiga (iyo waalidkaa/masuulkaaga, haddii ay jiraan) waxaad xaq u leedihiin in la idiin sheego (ama la idin ogeysiiyo) ficilka ay qaadeen xafiiska taakuleynta in laga qaadan karo racfaan iyo sida loo soo xareysto racfaanka gobolka. Waxaa ka mid ah in la idiin sheego qofka aad la xiriireysaan, iyo sidoo kale ficilka iyo wakhtiga yar ee lagu soo xareysanayo cabashada racfaanka.
2. Waxa laga yaabaa in aad cabashada caawimaad uga hesho xafiiska taakuleynta ama xafiiska racfaanka gobolka ee taageeradaada iyo isku-duwaha adeegga/ama ururrada kale ee masuulka ka ah in ay kugu caawiyaan arrimahan oo kale.
3. Waxaad xaq u leedahay in, hab qoraal ah, lagugu soo ogeysiiyo sababaha loo qaadayo ficilka.
4. 45 maalmood gudahood: Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato go'aanka xaqu-yeelashada maaliyadda.
5. 45 maalmood gudahood: Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato go'aankii hore xaqu-yeelashada waxqabadka.
6. 90 maalmood gudahood: Waxaad xaq u leedahay in aad rafcaan ka qaadato go'aan kasta oo ku saabsan taageero kasta ama adeeg kasta oo qofka ku jira barnaamijka iyo/ama waalidka qofka iyo/ama masuulka ay u doorteen Barnaamijka Waiver (Taakuleynta) CLTS.
7. 90 maalmood gudahood: waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato go'aanka xaqu-yeelashada waxqabadka ee iyo dibu-eegista sannadka soo socda. Go'aamada la sameeyo inta ilmuhu yar yahay ama yahay dhallinta ee cusbooneysiinta sannad kasta si loogu sii qoro barnaamijka.

## E. Tallaabooyinka ay qaadaan xafiisyada ku lugta leh racfaanka

Waxaad xaq u leedahay in aad rafcaan ka qaadato tallaabada/go'aanka xafiiska taakuleynta ka hor inta aan ficilka/go'aanka la fulin. Waa in lagugu soo ogeysiiyo, qoraal ahaan, go'aan kasta oo racfaan ah la qaadan karo oo waa in lagu siiyo wax aan ka yarayn 10 maalmood si aad racfaan uga qaadato.

Tallaabooyinka ama go'aamada soo socda ee uu sameeyo xafiiska taakuleynta rafcaan ayey ka qaadan karaan dadka ama waalidkood (carruurta) ama masuuliyiinta iyadoo loo qaban doono dacwad-dhageysi caddaalad ah oo ay u garqaadeyso Department of Administration, Division of Hearings and Appeals (Waaxda Maamulka, Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka).

1. **Denial of eligibility (Diidmada xaqu-yeelashada)—**Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa diidmada xaqu-yeelashada barnaamijka.
2. **Termination of eligibility (Joojinta xaqu-yeelashada)**—Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa joojinta xaqu-yelashada barnaamijka. Joojinta Adeegyada Daboolan.

3. **Termination of waiver-covered services (Joojinta lacagbixinta adeegyada taakuleynta)**[1]—Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa joojinta lagu taliyo ee ah adeeg kasta oo uu lacagtiisa bixinayo barnaamijka taakuleynta, iyada oo aan loo eegeyn sababta joojinta keentay.
4. **Reduction of waiver-covered services (Yareynta taakuleynta-bixinta adeegyada)—**Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa yareyn kasta oo lagu taliyo in laga goynayo adeegyada lagu bixiyo lacagta barnaamijka taakuleynta, iyada oo aan loo eegeyn sababta yareynta keentay.
5. **Choice between institutional and community services (kala-doorashada xarumaha adeegyada iyo bulshada gudaheeda)**—Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa marka uu xafiisku ku siin waayaan kala-doorasho ah adeegyada xarumaha iyo adeegyada bulshada gudaheeda. Xuquuqdan ah racfaanka ma khuseyso marka ay maxkamad soo amarto meelayn ah bulshada gudaheeda iyo adeegyo ah kuwa xaddidan iyo/ama beddiil ah sida ugu badan dhexgalka dadka.
6. **Choice of type of service (Kala-doorashada nooca adeegga)**—Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa marka uu xafiisku ku siin waayaan kala-doorasho ah noocyada kala duwan ee adeegyada bulshada gudaheeda ee lagu bixinayo taakuleynta, markay is le'eg yihiin qiimaha adeegyada. Arrintan waxay khuseysaa oo keliya markuu mid kasta oo ka mid ah adeegyada kala duwan, ee la bixinayo ku habboon yahay baahiyada muhiimka ah si aad ugu gaarto natiijooyinka aad rabto.
7. **Denial of choice of a qualified service provider (Diidmada kala-doorashada shaqaalaha adeegga ee xirfadleyaasha ah)—**Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa marka lagu siin waayo (ka-qeybgelidda) kala-doorashada xirfadleyaasha marka ay isku mid yihiin kharashka adeegyada ee baahidaada la qiimeeyey iyo natiijooyinka la rabo.
8. **Denial of authorization of an item or service (Diidmada oggolaanshaha waxyaabo ama adeeg)—**Rafcaan ayaad ka qaadan kartaa go'aan kasta oo uu xafiiska barnaamijka taakuleynta wax kuugu diidayo ama kaaga xaddidayo adeeg ama waxyaabo aad codsaday sabab kasta oo ay tahay, haddii adeegga ama waxa lagu bixinayo Barnaamijka CLTS Waiver (Taakuleynta).

## F. Halka aad caawimaad ka heleyso

**Codsade ama ka-qeybgale kasta oo ku jira CLTS (ama qofka sharci ahaan u metalaya) waa in uuu la soo xiriiro:**
**Disability Rights Wisconsin oo Xaruntooda Laga Helayo barta** www.disabilityrightswi.org

**Xafiiska Madison**
1502 West Broadway, Suite 201
Monona, Wisconsin 53713
Taleefanka: 608-267-0214 ama
1-800-928-8778 (lacag-la'aan)
Fakiska: 833-635-1968

**Xafiiska Milwaukee**
1205 South 70th St. Suite 501
Milwaukee, Wisconsin 53214
Taleefanka: 414-773-4646 (cod-duubis) ama
1-800-928-8778 (lacag-la'aan)
Fakiska: 833-635-1968

## G. Waajibaadka codsadaha/ka-qeybgalaha

Waxaa jira waajibaad gaar ah oo laga rabo qof kasta markuu soo codsado ama uu ka qeybgalayo Barnaamijka CLTS Waiver (Taakuleynta). Haddii aad ka soo bixi weydo waajibaadkaaga, waxaad waayeysaa xuquuqdaada barnaamijka. Waxaa muhiim ah in aad soo sheegto isbeddelka xaalkaaga si aan laguugu diidin barnaamijka. Isbeddel kasta waa in si degdeg ah loogu soo sheego xafiiska barnaamijka taakuleynta, guud ahaan ilaa iyo 10 maalmood gudahood marka uu isbeddelku dhaco.

1. Joogtee xiriirkaaga Isku-duwaha Taageerada iyo Adeegga oo ka qeybqaado qorsheynta adeegga iyo hawlaha dibu-cusbooneysiinta.

[1] Adeegyada ku qoran qorshaha ee aan lagu soo oggolaan Barnaamijka CLTS Waiver (Taakuleynta) looma tixgelinayo in ay yihiin adeegyo lagu bixinayo lacagta adeegyada.

2. Soo sheeg haddii aad guurto.
3. Soo sheeg wixii dhaca, sida ay kuugu sheegeen xafiiska barnaamijka taakuleynta iyo sida ku cad Hoggaanka Qoyska ee Soo-sheegidda wixii Dhaca (P-00069A).

Saxiixayga hoose wuxuu muujinayaa in wax kasta la igu wargeliyay oo aan fahmay xuquuqahayga iyo waajibaadkeyga ee Barnaamijka CLTS Waiver (Taakuleynta). Macluumaadka la i siiyey waxaan ku helay af ahaan iyo qoraal ahaan.

**Saxiixa** — ka-qeygalaha/masuulka: ____________________________________ Taariikhda la saxiixay:_______

**Saxiixa** — isku-duwaha taageerada iyo adeegga: ________________________ Taariikhda la saxiixay:_______